

# Qoraal la eegto habka loo isticmaalo codisga elektarooniga ah

Haddii aad ku leedahay aqoonsiga bangiga ama aqoonsiga Freja ee telefoonkaaga gacanta ama kumbiyutarka, waa inaad ka codsataa kaalmada dhaqaale adiga oo isticmaalaya kumbiyutarka, Ipadka ama telefoonka gacanta.

## Sidan samee

1. Ku qor [www.nykoping.se](http://www.nykoping.se) akhristaha websaydkaaga
2. Guji **Taageerada iyo daryeelka (Omsorg och Stöd)**
3. Aad/tag **Taageerada dhaqaale (Ekonomiskt stöd)**
4. Guji **Kaalmada dhaqaale (Ekonomiskt Bistånd)**  
Halkan waxaad ka heli doontaa macluumaaad ku saabsan sida kaalmada dhaqaale u shaqayso iyo waxyaabo laga yaabo inay fiican tahay inaad ogado inta aanad codsigaaga samayn ka hor iyo waxa ay tahay inaad samayso codsigaaga kadib.
5. Haddii ay tahay markii kuugu horraysay ee aad codsanayso, waa inaad soo wacdaa telefoonka 0155-24 80 55 qaybta qaabbilaada isniin- khamiis 13.30-14.30.
6. Guji Codsiga markii ugu horeysay.
7. Guji batanka buluuga ah ee **Codsiga adeeggaa elektaroonigga ah ( Ansök via e-tjänst).**

**Ansök via e-tjänst**

## 8. Ka dooro sida aad u geleyso


- a) Aqoonsiga bankiga (BankID) isla aaladdaa
- b) Aqoonsiga bankiga (BankID) ee aalad kale
- c) Freja eID+

## 9. Geli tobankaaga lambar (personnummer) oo guji OK

Haddii aad la dalbanayso xaaska/sayga/qof aad isla deggen tahihiin/qof aad lamaane tahihiin waa inuu marka hore galoo qofka sharciga u lehi, ama qofka ugu da'da weyn labadiina xiriirka isku jinsi ah lehi.

**10.** Fur aqoonsigaaga elektarooniga ah oo geli koodka gaarka kuu ah

**11. Guji codsi cusub**



**12.** Buuxi goobaha bannaan dhammaantood Ku qor **0** meesha aanad ku lahayn dakhli ama kharash

**13. Guji Kaydinaya**

**14. Tag bogga xaggiisa hoose oo guji **Ku xiga****

**15. Hubi inaad ku buuxisay macluumaaad sax ah**

**16. U dhaadhac bogga xagga hoose, akhri oo guji saddexda khaanadood ee far geeska ah**

- Jag är införstådd i mina rättigheter och skyldigheter. ②
- Jag försäkrar att jag är införstådd i hur informationen jag delgett kommer att hanteras enligt gällande lagstiftning. ②
- Jag försäkrar att all information är riktig och är införstådd med att uppgifterna kan bli föremål för kontroll.

Tillbaka

Skriv ut

Skicka in

**17. Guji **Soo dir** oo sug ilaa aad ka helayo xaqiijin ah in codsigii la diiwangeliyey**

- Jag är införstådd i mina rättigheter och skyldigheter. ②
- Jag försäkrar att jag är införstådd i hur informationen jag delgett kommer att hanteras enligt gällande lagstiftning. ②
- Jag försäkrar att all information är riktig och är införstådd med att uppgifterna kan bli föremål för kontroll.

Tillbaka

Skriv ut

Skicka in

**18. Haddii aad si wadajir ah ula codsanayso xaaska/sayga/qof aad isla deggen tahhiin/qof aad lamaane tiihin, hadda waa inuu qofkaasi galoo **Raadso kaalmada****

**dhaqaale (masruufka taageerada)** isagoo ku geleya aqoonsiga elektaroonigiisa (ha sameeyo qodobbada 1-6aad) kadibna haku ansixiyo codsiga isagoo:

- a) Gujinaya **Sug oggolaanshahaaga**
- b) U dhaadhac bogga xagga hoose, akhri oo guji saddexda khaanadood ee far geeska ah
- c) Guji **Soo dir**